

## Ku soo dhaaow hooygaaga cusub

Wax fudud ma han in laguuro. Marka loo guuro guri cusub shaqo badan ayaa laqabtaa. Waxaa suura gal ah in alaab muhiima ay ku dhunto geedigaas. Haddii uu kaa dhumo Kaar ka cod-bixinta iyo haddii kaleba waxa aad u baahantahay inaad saxdo, oo aad cusbooneysiisid akhbaartaada oo ay ku jirto ciwaanka gurigaaga cusub.

Arji is-diiwaan gelin codaynta ah ayaa ku jira macluamadkan. Is-diiwaan geli maanta si aad ugu diyaargarowdo doorashooyinka soo socda. Waxaad samayn kartaa inaad :

- Buuxiso Arjiga la socda warqaddan kuna dir boosta
- Buuxiso is-diiwaangelin internetka ee bogga cinwaankiisu yahay: [vote.minneapolismn.gov/renter](http://vote.minneapolismn.gov/renter).

Waxaad is-diiwaan gelin kartaa kana codayn kartaa Minnesota haddii aad tahay:

- Muwaadin Maraykan ah.
- Maalinta codaynta da'daadu tahay ugu yaaraan 18 sano.
- Haddaad degantahay Minnesota ilaa 20 casho ka hor maalinta codaynta.
- Haddad dhamaysatay gebi ahaan xukun danbi aad u xidhnayd .
- Ka fiiri shuruudaha codaynta oo dhan boogan: [vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov)

## Ogow maalmaha doorashooyinka sanadka 2017

### Doorashada Guud

- Maalinta codayntu waa Talaada, Noofambar 7.
- Warqadaha codaynta maqanayaasha waxaa heli kartaa laga bilaabo Jimcaha, Sebtembar. 22.
- Maalinta u danbaysa is diiwaan gelinta hore waa Talaada, Oktoobar 17.\*

\*Haddii ay ku dhaafto maalinta u danbaysa ee is-diiwaan gelinta hore, weli waad is diiwaan gelin kartaa oo codayn kartaa maalinta doorashadu dhacayso. Boogan ka fiiri caddaymaha lagaaga baahan yahay ciinwaankaaga iyo oqoonsigaaga: [vote.minneapolismn.gov/voters/ELECTION-DAY-REGISTER](http://vote.minneapolismn.gov/voters/ELECTION-DAY-REGISTER) . Haddii aad xili hore is diiwaan galiso, waqti kaama dhumayo, umana baahanaysid inaad la timmaado warqado aqoonsi dheerad ah.

### Wixii macluumaad dheeraada ah oo ku saabsan doorashooyinka iyo codaynta:

Booqo bogga internetka doorashooyinka iyo codaynta ee magaalada Minneapolis:

[vote.minneapolismn.gov](http://vote.minneapolismn.gov)

ama 311 :

[www.minneapolismn.gov/311](http://www.minneapolismn.gov/311)